



Maxay ku  
la tahay

# Masiixa?

C. R. MARSH



Maxay ku la tahay Masiixa?(1) Wax kasta waxaan la xiriirinaynaa jawaabta aad ka bixisaa su'aashan: farxaddaada noloshan, ee xaggee aad joogi doontaa nolosha soo socotaa.

Mardhow, Ciise wuu soo noqon doonaa, markuuna soo noqdo wuxuu ku waydiin doonaa, sidaan ayuu u waydiinayaa dadka markaas, “Maxaad igu la tahay?” Waxaan ahay Masiixi. Sidaas darteed waxaan ahay saaxiibkaaga. Si dhab ah waxaan rabaa inaad garato yuu yahay Ciise, waxaana ugu muhiimsan inuu qofna ku soo dhuufsado ku saabsan waxan muhiimka ah. Laga yaabee waxaad umalaynaysaa inuu yahay nebi keliya, nin wanaagsan, midka dadka kale la mid ah. Laakiin Wuxuu yahay mid gaar ah. Isaga wuxuu yahay mid aan la isla barbardhigi karin. Ma ku jiro mid kale sida isaga dunidan ama dunida soo socotaa. Adiga naftaada iska qiyaas.



## WAA KUMAA MASIIXA?

*(waxaa ka sheekeeynayaa G. Nehls)*

Al-Masih? - Masiixa! Haa, laakiin kani waa magac, eray macnaha la'aan ilaa waxaa ku buuxaa macnaha saxa ah mooyaane.

'Masih' waa hab Carabi ah erayga Cibraaniyada 'Mashiah' ama, sidaa aan dhahnaa maanta "Masiix". Waxaan garanaynaa tafsiirka Girigga eraygan waa 'Christos', si gaaban ah 'Kiristooos', waxaana garanaynaa kani waa magaca Ciise. Laakiin weli ma garanayno macnaha! Aragti kaloo duwan, hadduu Ciise ayaa ku dhashay Inkas ee degaanka Ameerikada Koofurta, ama dal ku beegan bariga Aasiya, hadduna goortaas u sheegay dadka inuu yahay Masiix, siddee ay ficil-qaaadi lahayeen? Ma ficil-qaaaden. Ma garanaynin erayga midkoodna fikradda guudguud ahaaney. Waxaa jiray hal bulsho keliya oo garanayeen - dadka Yuhuudda.

Waxay sugen Isaga! *Kitaabkooda* keliya magaca iyo fikradda guud ee Masiixa waxaa waxyooday. Sharciga Muuse waxaa amray Ilaah Qaadirka ah inay dadka oo dhan karaameeyay ujeedooyin quduus ah waxaa 'subkayay', sidaa saliid, oo ku daray caraf khaas ah, waxaa ku shubay iyaga. Sunnahan wuxuu muujiyay inuu Ruuxa Quduuska ee Ilaah oo ku shubay iyaga si ay u fulin karaan ujeeddada Ilaah. Waxaa in badan sameeyay inuu karaameeyo wadaad, nebiyo iyo boqor dalka Israa'iil. Waxyiyo kale waxay wax ka sheegeen inuu mid khaas ah ayaa imaan doonaa inuu ka bilaabo xeerka Ilaah dadka Yuhuudda keliya ma aha laakiin dadka kale oo dhan. Wuxuu keeni doonaa nabadda Ilaah dunida. Ilaah waxaa lagu waxsheegay nebi Daanyeel (sida 600 sannadood Ciise ka hor) magaciisa iyo waqtiga Imaatinkiisa.

Dadka Yuhuudda waxay sugen Masiixa ilaa waagii (inkastoo inta badan way diideen Isaga markuu yimid!). Warbixinta waqtiga dhalashada Ciise waxay noo sheegaysaa inay dadka Yuhuudda

oo tiro badan ku sugaan muujintiisa macbudka. Way akhriyeen waxayna fahmeen waxyiga Daanyeel.

Markuu Ciise yimid waxaa oogaday dad badan inuu yahay Masiixa. Qur'aan wuxuu qaadanaayaa magacan Ciise fahansiinta la'aan. Inuu helo macnaahiisa waa inaan u leexano bilowga keliya ee jira, Axdiga Cusub ama *Injiil*. Injiilka dhexdiisa Ciise wuxuu waydiiyay culummaddii, cadowgiisa diineed, su'aalaha muhiimka ah. **Maadaama uu yahay muhiimadda halis ah anaga oo dhan, waxaan waydiinayna mar kale:**

*ADIGA maxay ku la tahay Masiixa?*

*Maxay ku la tahay*

**DHALASHADIISA CAJIIB AH?**

Qofna weli ma u dhalin sida Isaga. Wuxuu yahay Ciise, wiilka Maryan. Waxaad ugu yeeraysaa Ismaaciil wiilka Ibraahim, Yooxanaa wiilka Sakariyas, Mohammad wiilka Abdullah. Niman kale oo dhan waxay qaadaan magaca aabbahooda. Ciise muxuu u qaatay hooyadiisa magaceeda? Maadaama u lahayn aabbo insaan ah. Waxaa dhashay bikrada Maryan. Waxaa uu ku dhashay awoodda Ilaah (*Qadarka Allah*), dhexgaliska qof la'aan. Toddoba boqol sannadood intu dhalin ka hor, nebiga Ishacyaah wuxuu wax ka sheegay siduu u dhalan doonaa: "*Haddaba Rabbiga qudhiisa ayaa calaamad idin siin doona. Bal ogaada, gabadh bikrad ah baa uuraysan doonta, oo waxay dhali doontaa wiil, oo magaciisana waxay u bixin doontaa Cimmaannu'eel [Ilaah nala jooga]*".(2) Ee wixii oo dhan ayaa ku dhacay si dhabta ah sida waxaa wax ka sheegay, sidaa aad ku akhrini kartaa Matayos 1:18-25, qaybta Axdiga Cusub ama *Injiilka*.

Ilaah wuxuu ka sameeyay ciida dhulka Aadan, abbaheenna, anagana oo dhan carruurta Aadan baynu nahay, sida oo kalena nebiyada oo dhan. Waxaan ka nimid dhulka - la xiriira dhulka.

Ciise wuxuu ka soo degay jannada. Waxaa ugu yeeray **al Manzul: Kii soo degay**. Wuxuu ahaa daahir ee nadiif, sidaa barafka iyo roobka. Kuwa kale oo dhan waxay yihiin sida dhulka: wasakh, najaas waxayna halleeyay dambi. Waxaan akhriyaynaa in „Ciise dunida u yimid inuu badbaadiyo dambilayaasha”.(3) Wuxuu u yimid meel ajnabi ah. Waxaad ku dhalatay halkan. Ciise wuxuu ku jiray Ilaah jiritaankiisa intuu imaanin ka hor. Wuxuu go'aansaday inuu u imaado dunidan si u noo badbaadiyo. *“Bilowgii waxaa jiray Erayga”*. Wuxuu ahaa wuxuuna ahaa Eraygaas. Wuxuu ku jiray jirka insaanka, wuxuuna noqday qof. Wuxuu ka yimid samada. *“Bilowgii waxaa jiray Erayga, Erayguna wuxuu la jiray Ilaah, Erayguna wuxuu ahaa Ilaah. Isagu Ilaah buu la jiray bilowgii. Wax walba waxaa laga sameeyay xaggiisa, oo wixii la sameeyay lama samayn isaga la'aantiis.... Erayguna jir buu noqday, oo waa ina dhex joogay, oo waxaannu aragnay ammaantiisii..”*.(4)

Mar ayaa laba nin ku dhaceen god dheer. Mid wuxuu ku yiri kii kale: “Iga badbaadi meeshan balaayada leh. Fadlan, iga soo qaad wasakhda iyo dhiqada.” Midkii kale ayaa ku jawaabay: „Qof doqon ah baad tahay, sidee aan u sameeyn karaa? Waxaan iskula jirnaa dhib sida adiga oo kale.” Labadooda waxay ku jireen god, midkoodna ma caawini karin midka kale. Kaddib waxay maqleen cod ka sarreeya oo dhahayaa waa inay qaadaan xarig. Ninka ku jirin god wuxuu ahaa nin keliya oo badbaadin karay Isaga. Wuxuu keenay caawimaadka ka sarreeya. Nebiga ugu fiican nebiyada ka mid ah ma naga badbaadin karin godka dambiga, laakiin Ciise ma lahayn dabeecad dambi leh. Wuxuu ka yimid samada. Ilaah wuxuu soo diray malaa'igo si ay sheegaan dhalashadiisa (akhri Matayos 1:20 iyo Luukos 2:9). War fiican waaye! Weligiis ninna uma hadlan sida Ninkan. Wuxuu yahay mid gaar ah. Isaga wuxuu yahay mid aan la isla barbardhigi karin.

## *Maxay ku la tahay* **DABEECADDIISA?**

Wuxuu ahaa kaamil. Weligiis hal mar ma dambaabin. Weligiis muu sameeynin khalad. Weligiis ma u baahnin inuu cafis waydiisto. Nin kasta oo cabsanayaa Ilaah waa inuu u qiro dambigiisa waana inuu cafis waydiistaa. Daa'uud wuu sameeyay. Ibraahim wuu sameeyay. Runta waxaa weeye inuu jiray hal nebi oo yiri inuu ka cafis waydiisto Ilaah toddobataan mar maalin kasta. Waxaad ka baari kartaa Kitaabka Quduuska ah iyo Qu'raan si bilaash ah inaad ugu hesho hal ayaad halkaasoo Ciise cafis ku wadyiisanaaya. Ma u baahan cafis, maxaa yeelay, wuxuu ahaa midka dambi lahayn. Weheladiisa qaaliga ah waxay qoreen wax ku saabsan Isaga waxayna dhaheen: *"Isaga ma garanynin Dambi. Isaga ma dambaabin. Dambi ma ku jirin Isaga"*. Waxay ahayeen niman oo si fiican u garanayay Isaga. Ilaah wuxuu cafiyay nebiyada markay qireen dambigooda, laakiin Ciise ma u baahnayn cafiskaas. Wuxuu ahaa dambilaawe. Xittaa, wuxuu ku yiri cadowgiisa: *"Midkiinne baa dambi igu caddaynaya?"*(5) Midba midkii kale ayuu farta fiqay. Yaa anaga naga mid ah oo la tartami? Waxaa loo geeyay xaakinka Bilaatos hortiisa waxaana lagu eedayay Ciise inuu qaldan yahay, laakiin Bilaatos wax khalad ah maku helin. Oo wuxuu ka dhaqdhaqday gacmahiisa wuxuuna yiri: *"Anigu waan ka eedla'ahay ninkan xaq ah dhiiggiisa"*. Weligiis ma jirin nin kale oo dambi lahayn. Wuxuu ahaa nebi oo dambi lahayn ee keliya. Wuxuu yahay mid gaar ah. Isaga wuxuu yahay mid aan la isla barbardhigi karin.

## *Maxay ku la tahay* **ERAYGIISA?**

Mar ayay cadowgiisa waxay direen booliis si ay u qaabtaan Isaga. Waxay dhegaysanayeen bariddiisa, kaddibna waxay soo noqdeen iyagoon xirin Isaga, waxayna si yaab leh u dhaheen: “*Ninna weligiis uma hadlin sida nikaasi u hadlay*”.(6)

Ka fikir muxuu yiri: “*Anigu waxaan ahay nuurka dunida. Kii i soo raacaa, gudcurka kuma socon doono, wuxuuse lahaan doonaa nuurka nolosha*”.(7) Mar kalena saaxiib muslin ah oo qaali ah wuxuu ii fahansiiyay: „Ma taqaana, saaxiibow, nebiyada waxay yihiin sida dayax. Dayaxa wuxuu iftiimayaa habeenkii. Nebiyadana waxay ku keeneen iftiinka Ilaah dunida maskiinka ah ee mugdiga ah. Dayaxa waa sida nebi. Wuu iftiimayaa, wuuna sii iftiimayaa ilaa dayax buuxa, kaddibna wuu sii gabaabsanayaa, wuuna dhimanayaa. Laakiin weligaa ha cabsanin, dayaxa kale meesha ayaa u soo aadayaa. Oo nebiyada way imaadeen, haddana nebiyada kale way yimideen. Mid wuxuu siiyay farriintiisa, wuu dhintay, meeshiisa ayaa siiyay nebi kale. Quruun kasta waxay leedahay iftiin qarkood oo ka yimid Ilaah”. Nimanka diimahooda waxay yihiin sida iftiinka shumac ama dayax. Laakiin yaa isticmaalayaa iftiinkaas yar markay qorraxda soo bixisay? Ciise wuxuu yiri: “*Anigu waxaan ahay nuurka dunida*”. Wuxuu yahay qorraxda xaqnimada. Weligaa ma araktay qorraxda oo soo gabaabsanaysaa ama yaranaysaa? Maya! Weligeed ma dhimaanin. Waxay u jirtaa qof kasta iyo dal kasta. Ciise waa sida qorraxda. Weligiis ma yaraato. In kastoo daruuraha dambiga ama iimaandarro ay qarinyaan qorraxda - way jirtaa iftiinka si kastaba! Wuxuu aahaanayaa dal kasta ee qof kasta.

Kittaa wuxuu yiri: “*Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha. Ninna Aabbaha uma yimaado, xaggayguu ku yimaado maabee*”. Nebiyada oo dhan waxay imaanayaan si ay u tusaan jidka soo noqodka Ilaah. Waxay yiraahdeen: “*Kani waa jidka Ilaah. Sameey*

*sidan. Raac barashadan. Kani waa jid. Adeeco amarado*". Laakiin Ciise wuu yiri: "Anigu waxaan ahay jidka. I soo raac".

Wiil yar wuxuu ka lumiyay jidkiisa magaalo wayn. Wuxuu ka yimid dal kale, mana si fican isu fahansiin karin si cad ah. Wuxuu waydiiyay askari si uu u sheegay jidka guriga. Askariga wuxuu ku yiri isaga: "Kor u soco waddada, bidixda labaad gal, haddana midigta saddexaad, gooy buundada, wareegso jasiiradda gariga, haddana u soco waddada dhexda ah..." Wiilka wuu ooyay. Askariga wuxuu u sheegay jidka saxda ah, laakiin wiilka wuu daalanaa, wuuna cabsaday inta badan si u raaci waayin tilmaanta. Isla waqtigaas nin oo ka yimid tuulada wiilka wuu soo socoday. Wuxuu qabsaday gacmahiisa. Markuu wiilka aad u daalanaa si u socon karin, ninka wuxuu qaaday Isaga, wuxuuna sii waday gurigiisa. Askariga wuxuu **tusay** jidka, laakiin ninka kale wuxuu **ahaa** jidka. Ciise wuxuu yiri: "Anigu waxan ahay jidka - jidka guriga Aabbaha".

Maxay ku la tahay qisadan cajiibka ah? (Akhri Luukos 15). Maxay ku la tahay casumaadda cajiib ah? Wuxuu yiri: "Ti kaalaya kulligiin kuwiinna hawshaysan oo culaabaysanow, oo anigu waan idin nasin doonaa".(8) Maxay ku la tahay eraygiisa? Ninna weligiis uma hadlin sida ninkaasi u hadlay. Wuxuu yahay mid gaar ah. Isaga wuxuu yahay mid aan la isla barbardhigi karin. Ma ku jiro mid sida Isaga oo kale samada ama dunida.

## *Maxay ku la tahay* **MAGACYAIIISA IYO** **DARAJOOYINKIISA?**

Nebi kasta wuxuu leeyahay macagiisa khaaska ah. Ibraahim wuxuu ugu yeeray saaxiibka Ilaah (*Khalil Allah*). Muuse wuxuu ugu yeeray afhayeenka Ilaah/Kii la hadlay Ilaah (*Kalim Allah*). Kuwa kale waxay ugu yeereen *Ruh Allah* ama *Kalimat ullah* (Ciise) iyo *Habib Allah* (*Muhammad*). Yaa ninka ayaa ugu jecelyahay ugu badnaan,



saaxiibkiisa ama ruuxiisa, ama caqligiisa, fikraddiisa ama eraygiisa kuwaasi yihiin isaga naftiisa? Toos u hadal imminka. Qalbigaaga ka jawaab. Haa, Ciise wuxuu ugu yeeray *Rub Allah and Kalimat ullah*. Waxaan akhriyaynaa Injiilka dhexdiisa Ilaah inuu ka dhahay Ciise: “*Kanu waa Wiilkayga aan jeclabay ee maqla Isaga*”.(9) Mar kale waxaan rabaa inaan ku waydiiyo, “*Yaa ninka ayaa jecelyahay ugu badnaan, saaxiibkiisa ama wiilkiisa?*” Sax. Wiilkiisa. Si ayaa u kala saaraa Isaga dadka kale oo dhan, Ilaah wuxuu ugu yeeray Ciise Wiilkiisa. Ilaah muxuu ka waday? Waxaan dhahaynaa wiilka inuu yahay araggiisa (*mathal*) aabbihiisa. Markaan arkaynaa Ciise, waxaan garanayna ku saabsan Ilaah. (10) Wiil wuxuu u istaagi karaa aabbihiisa meeshiisa wuxuuna matalayaa isaga. Wuxuu u hadli karaa aabbihiisa. Tani waa wax uu Ciise sameeyay markuu ku jiray halkan. Taasi waa sababta wuxuu ugu yeeray Erayga Ilaah. Ilaah wuxuu hadlay Isaga dhexdiisa.(11) Darajooyin u khaas ah. Isaga wuxuu yahay mid aan la isla barbardhigi karin.

## *Maxay ku la tahay* **AWOODDIISA?**

Wuxuu sameeyn karaa wax kasta. Awoodda iyo xukunka oo dhan waxaa siiyay Isaga. Run ahaantii, ma ku jiro shaqada Ilaah oo Ciise ma sameeynin markuu ku jiray halkan xagga dunida. Yaa sarakici kara kuwii dhintay, Ilaah mooyaane? Ciise wuxuu sarakiciyay kuwii dhintay. Yaa bogsiiin karaa kuwii qabay cudurka juudaanka ah si runta ah, Ilaah mooyaane? Ciise wuu daweeeyay wuxuuna nadiifiyay kuwii qabaa cudurka juudaanka. Yaa furi karaa aragga indholaha, Ilaah mooyaane? Ciise wuxuu sameeyay intaan oo dhan. Wuxuu bogsiiyay cudurka nooc kasta. Ninna weligiis waxaa ka soo diray Isaga oo ahaa nin dawaenin. Wuxuu ku ceriyay ruuxanta xun erayga. Wuxuu baddalay dadka noloshooda, markiiba wuxuu ka badbaadiyay iyaga dambiga.

Nebiyada badan waxay sameeyeen mucjisooyin waxayna ku bogsiiyeen dadka magaca Ilaah. Laakiin Ciise weligiis ma ku bogsaniin magac Ilaah. Si mar kasta ah wuxuu ku bogsiiyay ragga iyo haweenka Awooddiisa iyo Magaciisa. Wuxuu ku yiri ninka oo soconin soddon iyo sideed sanno: “*Waan ku dhahayaa, Kac oo soco*”. Ninka wuu kacay wuuna socday. Weligiis ma isticmaalin daawooyin. Wuxuu ku bogsiiyay dadka Magaciisa iyo Awooddiisa.

Nin oo la yiraahdo Laasaros wuu dhintay. Way aaseen isaga waxayna u yeereen Ciise. Markuu Ciise yimid, Laasaros wuu dhintay aasnaa afar maalmood. Ciise wuxuu u tagay xabaasha wuxuuna yiri: “*Laasarosow, soo bax*”.(12) Ninka dhintay wuxuu ka soo baxay xabaashiisa. Ciise wuxuu burburiyay shakigeenna ku saabsan Awooddiisa sida uu u sarakicin karo kuwii dhintay. Wuxuu yiri, “*Anigu waxaan ahay sarakicidda iyo nolosha*”.(13) Maalinta way imaanaysaa markay kuwaasi oo ku jiraan xabaasha maqli doonaan Codkiisa oona soo baxi doonaan. Waxaad ka soo baxi doontaa xabaasha hadaad tahay qof dhiman. Sida oo kale Muuse iyo Ibraahim iyo nebi kasta. Laakiin xittaa imminka Ciise wuxuu ku siin karaa nolol cusub, nolosha Ilaah, nolosha daa’imka. Wuxuu baddalayaa dadka noloshooda meel kasta dunida maanta. Wuxuu badali karaa noloshaada. Maxay ku la tahay Awooddiisa xoog badnaa? Wuxuu yahay mid khaas ah, mid awood buuxda leh, eemid aan la isla barbardhigi karin.

## *Maxay ku la tahay* **SILCINTIISA?**

Maxay ku la tahay Dhimashadiisa? Ma garanaysaa **meesha** aad ku dhiman doontaa? Halkan, ama dal kale? Badda dhexdeeda, jidka dhexdiisa, ama sariirtaada korkeeda? Xaggee? Haddana, **sidee** aad u dhiman doontaa? Cudurka dartiis, ama shilka dartiis, ama dhimashada caadiga darteed? Laga yaabaa waxaad i sheegi

kartaa, **gormaad** dhiman doontaa? Immisaa sanno aad jiri doontaa? Maalintee ee bishee aad dhimaan doontaa? Maxaa kuu dhaci doonaa dhimashada kaddib? Adiga iyo aniga waa inaan qirno inaan garanaynin waxyalahan. Ilaah wuu go'aansanayaa kulli.

Laakiin Ciise wuu gartay, wuxuuna wax ka sheegay xaggee ayuu ku dhiman doonaa: Yerusaaalem. Wuxuu wax ka sheegay sidee wuxuuna siiyay tafatirnaansho oo dhan.(14) Wuxuu u sheegay xertiisa gormuu dhimaan doonaa; Waqtiga Iidda markuu qof kasta dili doona wan si u dabbaaldegea Iidda Kormaridda. Wuxuu dhiman doona sida “Wanka Ilaah ee dambiga dunida qaada”. (15) Wuxuu u sheegay inuu sarakici doonoo maalinta saddexaad mar kale. Wax kasta wuxuu ku dhacay siduu yiri. Wuu gartay. Ma ahayn sida ragga kale. Anaga wax ma garanayno. Nebiyada wax ma garanaynin. Adiga iyo aniga goorta aan dhiman doono, sidee iyo xaggee Ilaah ayaa go'aansanayaa.

Laakiin Ciise wuxuu yiri, “*Ninna igama (noloshayda) qaado, laakiin anaa iska bixiya. Waxaan leeyahay amar aan ku bixiyo, waanan leeyahay amar aan haddana ku soo qaato*”.(16) Weligiis ma dambaabin, sidaas darteed mu qasbin inuu dhinto. Wuxuu tegi karay jannada dhimasho la'aan. Laakiin wuxuu go'aansaday inuu u dhinto dadka kale. Wuxuu iska bixiyay Noloshiisa anaga daraadeena. Wuxuu dhintay si anaga noo cafiyo. Wuxuu u dhintay adiga. Isaga, Arijirka Wanaagsan, wuxuu u siiyay Noloshiisa ido. Daa'uud, Ishacyaah, iyo nebiyada kale waxay wax ka sheegeen dhimashada Ciise, xataa: “*Xooggaygii wuxuu u engegay sidii dheri burburkiisa oo kale, Oo carrabkaygiina daamankayguu ku dhegay, Oo waxaad i gelisay ciiddii dhimashada. Waayo, waxaa i hareereeyay eeyo, Oo waxaa hareerahayga isku wareejiyay shirkii xumaanfalayaasha, Oo waxay iga mudeen gacmaha iyo cagaha. Lafahaygii oo dhan waan tirin karaa, Oo iyagu way i firiyaan oo igu dhaygagaan, Dharkayga bay qabsadaan, oo maradaydana saami bay u ritaan*”.(17) Ee “*Isaga waa la quudhsaday, waana la diiday, oo wuxuu ahaa nin murugeed, oo xanuun bartay...sida runta ah wuxuu xambaartay xanuunyadeennii,*

wuxuuna qaatay murugadeennii, laakiinse waxaynu ku tirinnay mid belaayo ku dhacday, oo Ilaah dilay, oo dhibaataysan. Laakiinse waxaa isaga loo dhaawacay xadgudubyadeenna, waxaana loo nabareeyay xumaatooyinkeenna, edbintii nabaadiinadeennana dushiisay ku dhacday, dildillaaciisiina waynu ku bogsannay. Dhammaanteen sidii ido baynu u hallownay, midkeem walba jidkiisuu u leexday, oo Rabbigu wuxuu Isaga dul saaray xumaanteenna oo dhan. Isaga waa la dulmay, waana la dhibay, laakiinse innaba afkiisii ma uu kala qaadin. Isaga sidii wan la qalayo baa loo kexeeyay, oo sidii lax ku aamusan kuwa dhogorta ka xiira hortooda, Isagu afkiisa ma uu furin. ..Isaga wuxuu laga gooyay dalkii kuwa nool. Xadgudubka dadkayga daraaddiis ayaa isaga loo garaacay. ..In kastoo uusan dulmi samayn, khiyaanona aanay afkiisa ku jirin...isagu naftiisuu geeri u huray, waxaana lagu tiriyay kuwa xadgudbay, weliba wuxuu xambaartay kuwa badan dambigood, wuuna u ducayay kuwa xadgudubay”.(18) Weligiis nin kale ayaa dhintay sida Isaga ayaa dhintay. Wuxuu yahay mid aan la isla barbardhigi karin, mid khaas ah iyaga ka mid ah.

## *Maxay ku la tahay*

# **GUUSHA DHIMASHADA KORKEEDA?**

Wuu dhintay, dadkana waxay aaseen Isaga. Cadowgiisana waxay isku dayeen si ay u ku sii wada jiraan xabaasha. Waxay garangariyeen dhagax wayn iridda xabaasha ka soo horjeedka. Waxay xireen dhagaxa waxayna ku hareeriyeen xabaasha askar hubaysan. Shaki kuma jirin inuu dhintay, nimankana waxay isku dayeen wax kasta inay ku xiraan Isaga xabaasha. Wuxuu ka sarakacay kuwii dhintay mar kale wuxuuna tusay Naftiisa oo noolaa xertiisa, Butros, Maryan, iyo 5,000 dad inka badan. Wuu sarakacay mar kale, sida ayaa yiri. Ilaah wuxuu rabay inuu tuso qof kasta xagga dunida inuu aqbalay shaqada Ciise. Dadkaas oo dhan way arkeen Isaga.

Way tabteen Isaga, waxay la cuneen la cabeen Isaga sarakiciddiisa kaddib. Wuxuu tusay iyaga boogtiisa oo ku jirtay gacmahiisa iyo cagahiisa iyo dinaciisa.

Dhimashada waa cadow wayn. Waa inaad dhimato, anigana sida oo kale! Nebiyada way dhinteen, way sii joogeen dad dhiman. Alxamdulilah, Ciise Masiix wuxuu ka guulaystay dhimashada. Imminka wuu noolyahay. Wuxuu badbaadin karaa kuwaasi oo dhan oo u imaanayaan Ilaah Isaga dushiisa, waayo wuxuu noolanayaa si uu ugu ducayaa Iyaga. Ma jiraa nebi kale oo noolaanayaa hadda markuu dhintay kaddib? Ciise mooyaane wuxuu ka sarakacay kuwii dhintay. Wuxuu yahay mid khaas ah iyo mid aan la isla barbardhigi karin. Ma jiro mid kale sida Isaga, xagga dunida ama jannada sidaa oo kale.

## *Maxay ku la tahay* **SARAKACIIDDA?**

Falimaha Rasuullada 1:9-11 waxaan ku akhrinaynaa: “...ayaa sare loo qaaday isagii, oo daruur baa indhahoodii ka qarisay. Oo intuu sii socday, iyagoo samada aad u fiirinaya, ayaa waxaa isa soo ag taagay laba nin oo dhar cadcad qaba, oo waxay ku yiraahdeen, Nimankiinan reer Galiliyow, maxaad la taagan tihiin oo aad samada u eegaysaan? Ciisahan samada laydiinka sare qaaday, sidaad u aragteen isagoo samada u socda oo kale ayuu u iman doonaa”. Oo Filiboyin 2:8-10: “Oo markuu nin u ekaaday, ayuu is-hoosaysiiyey oo addeecay inuu dhinto, xataa inuu iskutallaabta ku dhinto. Haddaba sidaas daraaddeed Ilaah isaga aad buu u sarraysiiyey, oo wuxuu isaga siiyey magaca magac kasta ka sarreeya; in jilib kastoo ah waxyaalaha samada ku jira iyo waxyaalaha dhulka jooga iyo waxyaalaha dhulka ka hooseeyaaba, ay magaca Ciise u wada sujuudaan”. Haddaan waydiin lahaa kooxda Yuhuudda midkee ay rabtaan si uu ku jiraa meesha ugu sareeyaa xagga jannada, kulli waxay dhihi lahaayeen Muuse. Haddaan waydiin lahaa Muslimiinta, waxay dhahi lahayeen Muhammad. Haddaan waydiin lahaa Masiixinta, waxay dhahi

lahaayeen Ciise. Laakiinse Ilaah ma ka wada hadlay Yuhuudda, ama Muslimiinta ama Masiixinta. Ilaah isaga aad buu u sarraysiiyay, oo wuxuu isaga siiyay magaca magac kasta ka sarreeya. Waa sameynta Ilaah. Jilib kastoo ah ee kibirsan waxaa inuu u wada sujuudaan Isaga.

*Maxay ku la tahay*  
**KU SOO NOQOSHADIISA**  
**DUNIDAN?**

Wuu soo noqonayaa mar kale. **Isaga** wuu yiri sidan.(19) Malaa'igaha way dhaheen sidan.(20) Masiixinta runta ah oo dhan waxay sugayaan Isaga. Muslimiinta waxay garanayaan inuu soo noqdo si u taliyo. Wuxuu imaanayaa inuu u qaado dadkiisa jannada si ay ula joogaan Isaga. Wuxuu imaanayaa inuu xukunko dunida oo dhan korkeeda; Wuxuu yahay dunida Boqorkeeda. Waa inuu wax xukumo ilaa cadaawayaashiisa oo dhan caghihiisa hoostooda geliyo. Dadka qaarkood waxay dhahayaan inuu xukumi doonoo afartan sanno. Ilaah wuu dhahayaa kun sanno. Waxaan amminsanahay Ilaah. Haa, wuu imaanayaa mar kale. Kaddibna qof kasta wuxuu aqbali doonaa inuu yahay Boqorka boqorrada, iyo Sayidka sayidyada. Wuu imaanayaa. Waxaad istaagi doontaa Isaga hortiisa. Wuxuu ahaan doonaa xukunkaaga.

Markaad arkaysaa Isaga weji ka weji, Wuxuu ku waydiin doonaa: "*Maxaan kula ahay?*" Jawaabtaada waa maxay? Haddaad dhahaysaa, "*Waxaad tahay midka nebiyada badan ka mid ah*" Wuxuu ku waydiin doonaa maxaad u raacin Amarahiisa, adiga waxaa xukumi doontaa waayo waxaad aammintay inuu yahay midka nebiyada badan ka mid ah keliya, laakiinse wuxuu yahay midaan la isla barbardhigi karin, Badbaadiyaha qur ah. Yaa soo noqonayaa inuu xukumo? Muuse, ama Ibraahim ama Daa'uud ama nebiyada kale? Maya! Rabbiga Ciise wuu imaanayaa wuxuu ahaan doonaa xukunka. Ilaah

wuxuu siiyay dad oo dhan hubaalka ku saabsan waxan markuu ka sarakiciyay Isaga kuwii dhintay. Il kasta waa inay aragto Isaga! Wuxuu yahay mid khaas ah.

*Maxay ku la tahay*  
**RABITAANKIISA KU SAABSAN  
ADIGA?**

Wuu dhahayaa, “*Ii kaalaya...oo anigu waan idin nasin doonaa*”.(21) Wuu ku yeerayaa maanta. Markuu u yeeray xertiisa ugu horreeya, waxay kala tageen guryahooda waalidiintooda, shaqadooda, waxyalahooda oo dhan si ay u raaceen Isaga. Wuxuu ku waydiinayaa inaad raacdo Isaga. Wuxuu ku waydiinayaa inaad aamminto Isaga, inaad u rumaysato Isaga Badbadiyahaaga, inaad isku dhiibto noloshaada Isaga oo Rabbiga ah. Wuxuu raba dhammaan. Hadduu yahay Kii oo isaga dhahayaa inuu yahay, doonistiisa surtagal bay yihiin. Wuxuu yahay mid khaas ah iyo mid aan la isla barbardhigi karin ku saabsan dhalashadiisa, ku saabsan noloshiisa daahirsan iyo dabeecaddiisa, ku saabsan darajooyinkiisa khaas ah, erayadiisa yaabka leh, awooddiisa aad u wayn, iyo wax ku saabsan silicintiisa iyo dhimashadiisa. Wuu nool yahay maanta; wuxuu la jiraa kuwaasi oo aaminsanyihiin Isaga. Wuxuu ugu ducaynayaa jannada kuwaasi oo rumaysanyihiin Isaga. Wuu imaanayaa mardhow. Ma ku jiro mid sida Isaga oo kale jannada ama dunida. Taasi waa sabab ayaa doonayaa inuu ahaado Boqorka iyo Rabbiga xagga noloshaada.



### **Tixraaca Kitaabka Quduuska Ah**

- |                           |                       |                               |
|---------------------------|-----------------------|-------------------------------|
| (1) Matayos 22:42         | (8) Matayos 11:28     | (15) Yooxanaa 1:29            |
| (2) Ishacyaah 7:14        | (9) Luukos 9:35       | (16) Yooxanaa 10:18           |
| (3) Timoteyos Kowaad 1:15 | (10) Yooxanaa 14:9    | (17) Sabuurrada 22:15-18      |
| (4) Yooxanaa 1:1-3,14     | (11) Cibraaniyada 1:3 | (18) Ishacyaah 53             |
| (5) Yooxanaa 8:46         | (12) Yooxanaa 11:43   | (19) Yooxanaa 14:1-3          |
| (6) Yooxanaa 7:46         | (13) Yooxanaa 11:25   | (20) Falimaha Rasuullada 1:11 |
| (7) Yooxanaa 8:12         | (14) Luukos 18:31-33  | (21) Matayos 11:28            |

**Tani Waa Daabacaadda Life Challenge**

**P.O. Box 50770 – 00200**

**Nairobi, Kenya**

**[info@lifechallenge.de](mailto:info@lifechallenge.de)**